**KA WARAN HADDII AAN BADELO FIKIRKAYGA?**

Waxaad badeli kartaa ama jojin kartaa dardaaranka horey Loo sii qoray xili kasta inta aad awoodo inaad sheegto doonistaada. Si aad u badesho qofka aad doonayso inuu go'aannada caafimaadka kuu gaaro, waa inaad saxiixdaa bayaan ama aad u sheegtaa dhakhtarka masuulka ka ah daryeelkaaga.

**MAXAA DHACAAYA MARKA QOF KALE UU GO'AAN KA GAARO DAAWAYNTAYDA?**

Isla xeerarka ayaa qabanaaya qof kasta oo go'aanno ka gaaraaya daryeelka caafimaadka asagoo wakiil kaa ah - wakiil caafimaad, wakiil aad magaciisa u sheegtay dhakhtarka, ama qofka ay maxkamadu u magacawday inuu kuu gaaro go'aanadaada. Dhammaan waxaa laga doonayaa inay raacaan Tilmaamaha Daryeelka Caafimaadka ama, haddii aadan wax tilmaamo ah bixin, doonistaada guud ee la xiriirta daawaynta, ayna ku jirto in lagaa joojiyo daawaynta. Haddii doonistaada daawaynta aan la aqoon, wakiilku waa inuu iskudayaa inuu go'aansho wax maslaxadaada koobaad ku jirto. Dadka ku siinaaya daryeelka caafimaadka waa inay raacaan go'aannada wakiilkaaga ama qofka masuulka kaa ah ilaa in daawaynta la codsaday ay tahay mid caafimaad ahaan xun ama aan waxba kuu tarayn. Haddii tani sababto khilaaf aan laga heshiin karin, dhakhtarku waa inuu sameeyaa dedaal macquul ah si loo helo dhakhtar kale oo la wareega daawayntaada.



**WALI MA LA I DAAWAYN DOONAA HADDII AANAN HAYSAN DARDAARANKA HORE?**

Aad iyo aad. Wali waad heli doontaa daawayn caafimaad. Waxaan keliya doonaynaa inaan ogaano in haddii aad si xun u xanuusato ilaa aadan go'aano gaari karin, in uu qof kale uu wakiil kaaga noqon karo gaarista go'aannada. Xasuusnoow in:

- **AWOODA WAKIILKA DARYEELKA CAAFIMAADKU** uu kuu sahlaayo inaad magacaabato qof wakiil ah oo kuu gaara go'aanadaada. Wakiilkaaga ayaa gaari kara inta badan go'aannada caafimaadka – maaha keliya kuwa la xiriira daawada naf celinta – marka aadan adigu gaari karin go'aanada. Waxaad sidoo kale u wakiilan kartaa wakiilkaaga inuu go'aano kuu gaaro xili hore, haddii aad dooneyso.
- WAXAAD SAMAYSAN KARTAA **TILMAANTA SHAQSIGA AH EE DARYEELKA CAAFIMAADKA** adoo qoraaya waxyaabaha aad dooneyso ee la xiriira daryeelka caafimaadka ama kala hadlaaya dhakhtarkaaga kadibna a codsanaaya dhakhtarka inuu ku qoro doonistaada galkaaga caafimaadka. Haddii aad taqaano liqa aad doonayso ama aadan doonayn noocyo gaar ah oo daawayn ah, Tilmaanta ayaa bixinaysa qaab wanaagsan oo aad ugu cadeynayso doonistaada dhakhtarkaaga iyo qof kasta oo door ku yeelan kara go'aaminta daawayntaada asagoo wakiil kaa ah.
- LABADAAN NOOC EE **DARDAARANNADA HORE EE CAAFIMAAD** ayaa la isla adeegsan karaa ama si kala duwan loo adeegsan karaa.

> *Si loo dhaqan gasho Sharciga Dadwaynaha ee 101-508, Midawga California ee Go'aanka Madax Banaanida ee Bukaanka ayaa diyaarshay buug tusmeedkaa sanadkii 1991; waxaa isbadel ku sameeyay sanaddii 2000 Waaxda Adeegyada Caafimaadka ee California, ayadoo ku darttay fikrado ay kasoo uruurisay xubnaha ururka iyo dhinacyada kale ee xiiseynaayay, si isbadelo loogu sameeyo sharciga gobalka.*

**SIDEE AYAAN KU HELAYAA XOG DHEERI AH OO KU SAABSAN SAMAYNTA DARDAARANKA HORE?**

Waydii dhakhtarkaaga, kalkaalisada, shaqaalaha bulshada, ama dhakhtarka inay kuu raadiyaan xog dheeri ah. Waxaad ka codsan kartaa qareen inuu kuu diyaariyo dardaaranka horey Loo sii qoray, ama waxaad buuxin kartaa dardaaranka horey Loo sii qoray adoo buuxinaaya qaybaha banaan ee foomka.


**GOBALKA CALIFORNIA**

**WAKAALADAHA CAAFIMAADKA IYO ADEEGYADA AADANAHA**

**WAAXDA ADEEGYADA BULSHADA**

PUB 325 (12/16)

Advance Directive Brochure:
Rev 12/2016_Somali

Flex your Power


© 2001 State of California

CDSS
CALIFORNIA DEPARTMENT OF SOCIAL SERVICES

# Xuquuqdaada Gaarista Go'aano ku Aadan Daawayntaada Caafimaadka



- Buug tusmeedkaan ayaa sharxaaya xuquuqdaada gaarista go'aannada daryeelka caafimaad iyo sida aad hadda u qorsheyn karto daryeelkaaga caafimaadka haddii aadan awoodin inaad naftaada u doodo mustaqbalka.
- Sharciga federaalka ayaa naga doonaaya inaan ku siino xogtaan. Waxaan filaynaa in xogtaan ay kaa caawin doonto kordhinta awoodaada maamulka daryeelkaaga caafimaadka.

## YAA GO'AAMINAAYA DAAWAYNTAADA?



Dhakhaatiirtaada ayaa ku siin doona xogtaada iyo talo ku aadan daawayntaada. Waxaad xaq u leedahay in aad doorato. Waxaad oran kartaa "Haa" daawayn kasta oo aad doonayso. Waxaad ku oran kartaa "Maya" daawayn kasta oo aadan doonayn – xataa haddii daawayntu ay kugu celin karto nafta muddo dheer.

## SIDEE AYAAN KU OGAANAYAA WAXA AAN DOONAAYO?

Dhakhtarkaagu waa inuu kuu sheegaa xauunkaaga iyo noocyada daawooyinka kaladuwan iyo dookhyada maaraynta xanuunka ee aad heli karto. Daawooyin badan ayaa keena "Cilado." Dhakhtarkaagu waa inuu ku siiyaa xog ku aadan ciladaha daawooyinka caafimaadku ay kugu keeni karaan.

Badanaa, wax ka badan hal daawayn ayaa ku caawin karta – dadkuna waxay fikrado kaladuwan ka qabaan nooca ugu wanaagsan. Dhakhtarkaaga ayaa kuu sheegi kara nooca daawooyinka aad heli karto, laakiin dhakhtarkaaga ayaan kuu doori karin daawada. Dookhaas adiga ayaa iska leh wuxuuna ku xiran yahay waxa muhiimka kuu ah.

## DADKA KALE MA IGA CAAWIN KARAAN GO'AANADEYDA?

**Haa.** Bukaannada ayaa badanaa wakiisha ehelkooda iyo saaxiibadooda u dhow si ay uga caawiyaan gaarista go'aannada caafimaadka. Dadkaan ayaa kaa caawin kara inaad ka fakarto dookhyada kuu banaan. Waxaad waydiin kartaa dhakhaatiirta iyo kalkaalisooyinka si aad ula hadasho qaraabadaada iyo saaxiibadaada. Waxaad waydiin kartaa dhakhaatiirta iyo kalkaalisooyinka su'aalaha aad qabto.

## MA DOORAN KARAA QOF EHEL AH AMA SAAXIIB SI UU IIGU GAARO GO'AANNADA DARYEELKA CAAFIMAADKA?

**Haa.** Waxaad u sheegi kartaa dhakhtarkaaga inaad doonayso qof kale inuu kuu gaaro go'aannada daryeelka caafimaadka. Waydii dhakhtarka inuu ku qoro qofka kuu noqonaaya "wakiilka" daryeelka caafimaadka diiwaankaaga caafimaadka. Awooda maamulku wakiilku ku leeyahay go'aanada caafimaadkaaga ayaa waxtar leh keliya inta lagu jiro daawaynta xanuunka aad hadda qabto ama dhaaca ama, haddii aad ku jirto xarun caafimaad, ilaa aad ka baxdo xarunta.

## KA WARAN HADDII AAN AAD U XANUUNSADO ILAA AANAN GAARI KARIN GO'AANADEYDA DARYEELKA CAAFIMAADKA?

Haddii aadan wali magacaabin wakiil, dhakhtarkaaga ayaa ku waydiin doona qaraabada ama saaxiibka kuugu dhow si uu kaaga caawiyo go'aaminta daawaynta kuugu haboon. Inta badan waqtiga arintaan ayaa suuragasha. Laakiin mararka qaar qof kasta ayaan aqbalayn go'aanka. Waana taas sababta ay muhiim u tahay haddii aad xili hore ku sheegi karto waxa aad doonayso in la sameeyo haddii aadan naftaada u hadli karin.

## MA QASAB BAA INAAN SUGO ILAA AAN XANUUNSADO SI AAN U SHEEGO WAXA AAN KA DOONAAYO DARYEELKA CAAFIMAADKA?

**Maya**, xaqiiqdii, waxaa haboon inaad doorato kahor intaadan aad u jiran ama u baahan in isbitaal lagu dhigo, lagu seexsho xarunta kalkaalinta, ama xarun kale oo daryeel caafimaad. Waxaad dooran kartaa **Dardaaran Daryeelka caafimaadka ee Horey** loosii qorey si aad u sheegto *qofka* aad doonayso inuu wakiil kaa noqdo iyo *nooca* daawaynta aad doonayso. Dukumiintigaan waxaa sidoo kale loogu yeeraa "mid hore" waayo waxaad diyaarsanaysaa kahor intaan loo baahan gaarista go'aannada caafimaadka dhimirka. Waxaa loogu yeeraa "tilmaamaha" waayo waxey sheegaysaa cida aad doonayso inay wakiil kaa noqdaan iyo waxa ay tahay in la sameeyo.

Gudaha California, qaybta dardaaranka horey Loo sii qoray ee aad u adeegsan karto inaad magacawdo wakiilka si uu kuugu gaaro go'aannada caafimaadka ayaa loogu yeeraa **Awooda Wakiilka Daryeelka Caafimaadka**. Qaybta aad ku sheegi karto waxa aad doonayso in la sameeyo waxaa la dhahaa **Tilmaanta Daryeelka caafimaadka ee Gaarka ah**.

## YAA SAMAYN KARA DARDAARANKA HOREY LOOSII QOREY?

Waad samaysan kartaa haddii aad jirto 18 sano ama ka wayn aadna awoodo inaad gaarto go'aanadaada madaxa banaan ee caafimaadka. Uma baahnid qareen.


## QOFKEE AYAAN U MAGACAABI KARAA INUU WAKIIL II NOQDO?

Waxaad dooran kartaa qof qaraabo ah oo qaan-gaar ah ama qof kasta oo kale oo aad ku kalsoon tahay inuu kuu hadlo marka ay qasab tahay in la gaaro go'aano caafimaadka la xiriira.

## GOORMA AYUU WAKIILKAYGU GAARAYAA GO'AANADAYDA CAAFIMAADKA?

Caadiyan, wakiilka caafimaadka ayaa gaaraaya go'aannada keliya kadib marka aad lumiso awooda gaarista go'aanada si madax banaan. Laakiin, haddii dooneyso, waxaad ku sheegi kartaa **Awooda Wakiilka Daryeelka caafimaadka** in aad dooneyso in wakiilkaagu bilaabo inuu go'aannada kuu gaaro isla markaba.

## SIDEE AYUU KU OGAANAYAA WAKIILKAYGU WAXA AAN DOONAAYO?



Kadib marka aad doorato wakiilkaaga, kala hadal qofka waxa aad dooneyso. Mararka qaar go'aannada daawaynta ayay adag tahay in la gaaro, waxaana run ahaantii fiican in wakiilkaagu yaqaano waxa aad dooneyso. Waxaad sidoo kale waxa aad dooneyso ku qori kartaa dardaarankaaga horey loo sii qorey.

## KA WARAN HADDII AANAN DOONEYN INAAN MAGACAABO WAKIIL?

Wali waxaad ku cadeyn kartaa doonistaada dardaarankaaga horey Loo sii qoray, adiga oo aan magacaabin wakiil. Waxaad sheegi kartaa in noloshaada la badbaadsho ilaa inta suuragalka ah. Ama waxaad sheegi kartaa in aadan dooneyn in lagugu xiro qalabka nafta badbaadsha. Sidoo kale, waxaad sheegi kartaa sida aad u dooneyso in laguu siiyo daawada xanuun baabi'iyaha ama nooc kasta oo daawayn caafimaad ah.

Xataa haddii aadan buuxin foomka **Tilmaanta Daryeelka caafimaadka Gaarka ah** ee qoran, waxaad kala hadli kartaa doonistaada dhakhtarkaaga, waxaadna ka codsan kartaa dhakhtarka inuu doonistaada ku qoro diiwaankaaga caafimaadka. Ama waxaad doonistaada kala hadli kartaa xubnaha qoyskaaga ama saaxiibada. Laakiin waxaa dabcan fudud in la raaco doonistaada haddii aad qorto.